



## Ma tahay in carruurteyda la tallaalo?



**Jawaab: Guud ahaan, haa!**



1. Health Canada ayaa waxay ansaxisey tallaallada COVID-19 ee carruurta iyo dhallaanka ay da'doodu tahay 5 sano iyo kuwa ka waaweyn.

2. Tallaalladu waxay yareeyaan halista uu cunugaaga ugu jiro in uu caabuqa qaado. Waxay la shaqeeyaan difaacyada dabiiciga ah ee jirka si ay u sameeyaan difaac.

3. In kastoo carruurta iyo dhallinyarada ay yar tahay in ay si xun ula xanuunsadaan COVID-19, waxay weli:

- la xanuunsan karaan COVID-19 waxayna ku faafin karaan dadka kale
- qaadi karaan caabuqa iyagoo aan yeellan wax astaamo ah
- qaadi karaan oo yeellan karaa saameyn muddo-dheer ah



### Ma ogtahay in?

- Carruurta iyo dhallaanka la ildaran xaaladaha caafimaadka qaarkood ay halis badan ugu jiri karaan in ay jiro daran ka qaadaan cudurka COVID-19.
- Tallaallada COVID-19 waxay jirka ku caawinayaan in uu la dagaallamo fayraska. Sida dadka waaweyn oo kale, carruurta iyo dhallinyarada waxay si fiican uga difaacan yihiin jirro daran 14 maalmood ka-dib kuurdooda ama tallaalkooda labaad.
- Kuwo uu horey ugu dhacey cudurka COVID-19 waa in weli la tallaallaa si ay isaga difaacaan ama uga hortagaan in uu caabuqa mar kale uu ku dhaco.

Haddii aad ka shakido in cunugaaga uu leeyahay xasaasiyad, la tasho dhakhtarkaaga.

Qoraalkan looguma talogalin in uu beddel u noqdo daryeelka iyo talada xirfadeed. Had iyo jeer raadso adeegyada xirfadle caafimaad ama adeeg bixiye caafimaad kale oo la aqoonsan yahay si aad u weyddiiso su'aalaha laga yaabo in aad qabto.

Financial contribution from  
Avec le financement de



Public Health  
Agency of Canada

Agence de la santé  
publique du Canada

**Metropolis**  
Institute - Institut

Waxaa xaqiijiyey MedComm – oo  
ah Naadiga Gaarista ee Ururka  
Ardeyda Caafimaadka ee McGill.



### Ma dooneysaa in aad wax badan oggaato?

Waxaad halkan ka oggaan kartaa wax badan oo ku saabsan tallaalka carruurta:

- Canada government, 'Vaccines for children: COVID-19', (Maarso 2022)
- Canada government, 'Vaccines for children: Deciding to vaccinate' (Janaayo 2022)
- Immunize Canada, 'Parents' (Disembar 2021)
- Children's Healthcare Canada, 'Immunizing Children with Confidence' (Janaayo 2022)